Tilmaamaha Bukaanka: Isu-diyaarinta Qalliinkaaga

Waxaaad ku-soo dhawaataa Xarunta Caafimaadka Swedish "Swedish Medical Center". Waxaaanu rajeynaynaa in aan ku siino daryeelka ugu fiican. Himiladayada waa in aad waayo aragnimo fiican oo dhinac kasta ah kala kulanto Swedish.

Si aad inooga gargaarto qabashada arrintaas, waxaaa jira dhowr waxyaabo aad u baahan tahay inaad ogaato oo aad samayso si aad isugu diyaariso qalliinkaaga. Waxaaad fadlan raacdaa tallaabooyinka soo socda:

1. Si taxaddar leh u akhri qoraalkan waxaaadna fiiro gaar ah siisaa cuntada ka horrayasa qalliinka iyo tilmaamaha ku saabsan daawooyinka.
2. Wakiil ka socda Swedish Medical Center ayaa ku soo wici doona:
   - Si uu kugu qoro cisbitaalka
   - Si uu ballan kaaga qabto jiifitaanka ka hor kalkaaliso xirfad leh ee isbitaalka Swedish ee aad ku yeelan doonto qalliinka
3. Haddii aad farriin taleefoon ah ka hesho Swedish, fadlan si dhakhso ah uga soo jawaab. Haddii aad rabto inaad la xidhiidho Swedish mar hore sii aad isku qorto ama ballan ugu qabsato jiifitaanka ka hor, waxaaad fadlan soo wacdaa lambarka hoose.
4. Wac xafiiska maaliyadda (fiiri hoos), haddii aad qabto su'aalo la xidhiidha caymiska ama kharashka qalliinka.

Wixii macluumaad dheeraad ah, waxaaad booqataa www.swedish.org qaybta adeegyada qalliinka "surgical services" ama bukaanka "for patients."

Waxaa kuu ballansan inaad qalliin ku yeelato:

- ☐ Xarunta Isbitaalka Ballard
- ☐ Xarunta Isbitaalka Cherry Hill
- ☐ Xarunta Isbitaalka First Hill – Xarunta Dhexe ee Isbitaalka
- ☐ Xarunta Isbitaalka First Hill – Machadka Xanuunka Lafaha

Xarunta Jiifitaanka Ka Hor:
Ballanta Jiifitaanka Ka Hor

Taariikhda: _____

Wakhtiga: _____

Waxaad fadlan ballantan hore u soo qaadataa dhammaan daawooyinkaaga hadda aad qaadato.

Ballanta Qalliinka

Xafiiska dhakhtarkaaga qalliinka ayaa ku siin doona taariikhda iyo wakhtiga aad imanayso cisbitaalka.

Taariikhda: _____

Wakhtiga: _____

Khariidad leh tlimaanta iyo meelaha baabuurta la dhigto ayaa baqshaddan ku jira. U aad Sajilaada Bukaanka arrimaha Qalliinka iyo Jiifitaanka Ka hor.

	Xarunta Isbitaalka Ballard	Xarunta Isbitaalka Cherry Hill	Xarunta Isbitaalka First Hill Xarunta Dhexe ee Isbitaalka iyo Machadka Xanuunka Lafaha
Taleefoon:	206-781-6245	206-320-4116	206-386-2997
Faakis:	206-781-6110	206-320-4390	206-386-2992
Maaliyadda:	206-781-6225	206-215-2310	206-215-2310
Taleefoonka bilaashka ah ee dhammaan xarumaha isbitaalka: 1-866-851-5111			

Haddii uu kugu jiro qalabka wadnaha "pacemaker" ama qalabka gudaha ee murqaha wadnaha (internal defibrillator), Waxaa AAD U MUHIIM AH inaad samayso waxyaabahan soo socda:

- Ogeysii dhakhtarkaaga wadnaha inaad leedahay qalliin.
- Muddada ballanta qalliinka ka hor , waxaad kalkaalisada u sheegtaa in aad qabto qalabkaas wadnaha mid ka mid ah.
- U soo qaado cisbitaalka waxyaabaha soo socda:
  - Magaca iyo lambarka taloeefonka dhakhtarkaaga wadnaha
  - Kaadhka aqoonsiga ee qalabkaaga caafimaadka

Isbeddelada Caafimaadkaaga

U sheeg takhtarka qalliinka haddii aad la kulanto isbeddel weyn xagga caafimaadkaaga qalliinkaaga ka hor. Isbeddeladaas waxaa ka mid ah hargab, duray, qandho, infekshan ama shuban.

Tilmaamaha La Xidhiidha Daawooyinka Qalliinka Ka hor

Iyadoo uu si kale ku faro takhtarkaaga qalliinka ama suuxiyuhu mooyaane, fadlan raac tilaam-bixintan marka aad daawo qaadanayso qalliinka ka hor:

Hal toddobaad qalliinka ka hor:

JOOJI qaadashada asbiriinka, Plavix iyo dham-maan daawada ay ku jirto asbiriin, sida Anacin, Excedrin, Fiorinol, Aggrenox iyo Alka-Seltzer.

Laba maalmood qalliinka ka hor:

JOOJI qaadashada aanay ku jirin isteeroydh, daawada huritaanka sida Celebrex, diclofenac, ibuprofen (Motrin, Advil), meloxicam (Mobic), nabumetone (Relafen), naproxen (Aleve, Naprosyn, Anaprox) iyo piroxicam (Feldene) iyo kuwa dheeriga ah sida ginseng, ginko ama toonta.

Subaxda qalliinka:

HA qaadan daawooyinka digitalis sida Digitek, Digoxin ama Lanoxin.

KU QAADO, kabasho biyo ah, daawada laguu qoray ee aad badiyaa qaadato subaxii (marka laga reebo kuwa kor ku taxan).

Tilmaamaha Cuntada ee Qalliinka Ka Hor

Iyada oo si kale ay kuugu sheegaan qalaagaaga iyo suuxiyahaagu mooyaane, waa inaad raacdo fariimahan cuntada ee qalllinka ka hor:

8 saacdood ka hor wakhtiga imaatinka	**JOOJI** cunista cuntada adag ama cabbitaanka sharaabka anad wax ka dhex arki karin (midka leh). **MAYA** CUNTO **MAYA** CAANO **MAYA**WAX CAANO KU JIRAAN **MAYA** KAREEMADA BUNKA (QAXWAHA) **MAYA** XANJADA LA CALASHADO **MAYA** NACNAC DURAYGA "LOZENGES" **MAYA** ALKOLADA (KHAMRIGA) Waxaad cabi kartaa sharaab biyo oo kale ah (midab lahayn). *Tusaale:* biyo, 7-Up, Gatorade, gelatin cad, juuska tufaaxa aan lahayn xabuubka, shaah aan midab lahayn ama bun MADOW
3 saacadood ka hor wakhtiga imaatinka*	**JOOJI** qaadashada wax kasta oo afka laga qaato, aan ka ahayn daawada, sida uu ku sheegay dhakhtarkaagu.

* *Ka-reeban:* Haddii aad uur leedahay, buuran tahay ama lagugu sheegay macaan, kilyaha aan shaqeynin ama laab dilaac ama lab-jeex, HA qaadan wax cunto ama cabbitaan ah siddeed sacadood ka hor wakhtiga imaatinkaaga.

KU QAADO daawadaada caadiga ah kabasho yar oo biyo ah, aan ka ahayn marka si kale lagu faro.

Maalinta Qalliinka Ka Hor

- Wac xafiiska qalliinka si aad u hubiso wakhtiga imaatinka.
- Dib u fiiri tilmaamaha cuntadaada ee qallliinka ka hor.
- Waxaaad u baahan tahay inaad LABA jeer qubaysato 24 saac gudahood muddada ay tahay qalliinkaagu — qaado qubayskaaga HORE habeenimada qalliinka ka hor. Raac tilmaamaha qubayska gaarka ah ee ku jira baqshadan.

Haddii Aad Leedahay Macaan (Sonkorow)

Tilmaamo Gaar Ah ee Subaxa Qalliinka!

HA qaadan WAX daawo macaan ah oo afka laga qaato.

Haddii aad isticmaasho insulin, hubi heerka sonkortaada subaxdaas. Haddii ay heerka sonkortaadu tahay 120 ama ka hoosayso, **HA** qaadan wax insulin ah, laakiin u soo qaado cisbitaalka.

Haddii aad leedahay qalliin subaxnimo oo heerka sonkortaaduna ka sareeyo 120, **QAADO** nus intii aad ka qaadan jirtay insulinta subaxdii.

Haddii aad ka imaanayso meel fog subaxa qalliinka, **HA** qadaanin intii aad ka qaadan jirtay insulinta subaxdii, xittaa haddii heerka sonkortu ka sarrayso 120.

Haddiii qalliinkaaga ballantiisu tahay galabnimada, fiiri heerka sonkorta ee dhiigaaga; dabadeedna wac Xarunta Jiifitaanka ka hor (isticmaal lambarka taleefoonka bogga koowaad ku yaal).

U rog bogga xiga fariimo muhiim ah oo la xidhiidha maalinta qalliinka.

Tilmaamo Muhiim ah

MAALINTA Qalliinka

- Raac tilmaamaha cuntada ee qalliinka ka hor iyo fariimaha daawada ee hagahan ku yaal ama sida uu ku faray takhtarkaaga qalliinka. **Haddii aadan raacin tilmaamahaasi, qalliinkaaga waa la daahin doonaa ama waa la burin doonaa.**
- Ku qaado daawadaad, kabasho yar oo biyo ah, sida ku qeexan fariimaha qalliinka ka hor ama sida uu takhtarkaaga qalliinka ku faray.
- Qaado qubayska LABAAD ee qalliinka ka hor wax yar ka hor imaatinka cisbitaalka. Raac tilmaamaha qubayska gaarka ah ee ku jira baqshaddaan. Timaha iyo jidhkaba waa inay ka maqnaadaan waxyaabaha qofku isku daryeelo sida buufinta timaha, cadarka, jeelada, cadarka xiiritaanka kaddib, kareemada wejiga, saliidaha, looshinka ama timo hagaajisada. Sidoo kale, **HA** soo xidhan okiyaallaha "contact lenses" ama maykab.
- Xidho dhar dabacsan, dhar iyo kabo nafis ah.
- **Fadlan soo qaado waxyaabahan:**
  - Kaadhadhka caafimaadka iyo farmasiiyaha iyo aqoonsi sawir leh (ID)
  - Lacag kugu filan oo kaliya (karaka amaahda) si aad isaga bixiso baarkinka iyo kharshyada daawada bixitaanka iyo lacagta dulsaarka ah ee caymiska. **Kaga kaalay DHAMMAAN waxyaabaha qiimaha leh guriga, oo ay ku jirto keredhit kaadhyada kale, lacag dheeraad ah, talefoonada gacanta iyo dahabka la isku qurxiyo ee aad maalin kasta xidhato.**
  - Wax kasta oo ka mid ah waxyaabahan waa lagu dabiqi karaa:
    - Liistada dawooyinkaaga iyo inta aad ka qaadato, haddii aanad hore ugu dhiibin kalkaalisada jiifitaanka ka hor
    - Buufiska, haddii aad neef qabto
    - Mashiinka C-Pap iyo qiyaasta laguugu xidho
    - Kaadhka aqoonsiga ee Qalab caafimaad oo kasta oo kugu jira ama aad qabto
    - Magaca iyo talefon lambarka dhakhtarkaaga wadnaha
    - Foomka oggolaanshaha oo uu saxiixay wakiilka sharciga ee bukaanka ee u baahan awood wakiilnimo oo jirta
    - Waalid ama wakiil sharci ah bukaanka ka yar da'da 18 sano si uu u saxiixo ogolaanshaha oo uu ula kulmo suuxiyaha
- Waxaad timaad cisbitaalka wakhtiga ballanta ee lagaa siiyey xafiiska takhtarkaaga qalliinka.

Ka Raysashada Qalliinka

Qolka raysashada, waxaa kugu daryeeli doona kalkaalisayaal si gaar ah u tababaran. Wakhtigaaga raysashada wuu kala duwanaan doonaa, iyada oo ku xidhan qalliinka. Haddi aad guriga aadayso isla maalintaasi, waxaa lagu martiqaadayaa qoyskaaga iyo saaxiibadaa inay kaala soo qayb galaan timaamaha qalliinka kaddib.

Qorshaynta Ku Noqoshada Guriga

Fadlan la qorshee baahiyaha bixitaankaaga qoyskaaga iyo/amaba asaxaabtaada qalliinkaaga ka hor.

Haddii ay kuu ballansan tahay inaad guriga ku noqoto isla maalinta qalliinka, waa INAAD haysataa qof wen opo kula socda, haddii kale qalliinka waa la burin (joojin). U MA kaxaysan kartid baabuur ilaa gurigaaga ama uma raaci kartid bas. Waxaaad qaadan kartaa tagsi haddii uu qof weyni kula socdo.

Waxaaan soo jeedinaynaa in qof kula joogo guriga qalliinka kaddib si uu kaaga caawiyo adeegga suuqa daryeelka ilmaha, wax kor u-qaadista, wax kariska, nadaafada, iwm.

Su'aalaha?

Haddii aad u baahato macluumaad dheeraad ah, fadlan wac Xarunta Jiifitaanka Ka hor ee cisbitaalka meesha lagugu qali doona. Waxaa kale oo aad booqan kartaa www.swedish.org oo fiiri Adeegyada Qalliinka hoostooda "Surgical Services."

© 2009 SWEDISH HEALTH SERVICES SU-06-06389 ESI 55625 (non-stocked) R-4/09